

Baaritaanka hore ee caafimaadka ee ilmaha da' da iskuulka gaadhay ee magangeliyo- doonka ah [Af-Soomaali]

Kouluikäisten turvapaikkaa hakevien lasten ja nuorten alkuterveystarkastus [Somali]

| MACLUUMAADKA GUUD (ANAMNEESI) | | | | | |
|------------------------------------|--|------------------------------|---|---|--|
| Macluumaadka shakhsiga | MAGACA AWOOWGA, AABAHA IYO MAGACAAGA: | TAARIKHDA DHALASHADA: | NAMBARKA UMAREK: | WADANKA AAD KU DHALATAY: Wadankee ayaad ku dhalatay? <i>Qor wadanka / Ma aqaan</i> | |
| | REERKA: Yaad la nooshahay imika? Imisa qof ayuu reerkaagu ka kooban yahay?? Wax isbedel ah miyey reerka ku soo kordheen | | ARIMAHA CUSLAYN KARA REERKA: Ma arimo culays ah ayaa dhanka reerkiina ka jira imika? Tusaale ahaan geeri ama marxaalado ad adag oo reerkiina haystaa.? | | |
| | AKHRINTA: Wax akhriskaagu waa sidee? <i>Qoraal kasta waan akhrin karaa / Qoraalada fudfudud ayaan akhrin karaa / Waxa aan akhrin karaa magaca, ereyo iyo weedho aad u fudud / Waxaba ma akhrin karo.</i> | | | WAXBARASHADA: Imisa sanno ayaad iskuul soo dhigatay? | |
| | GOOBAHA DEGENAANTA: Xaggee ayaad ku noolayd, intii aanad Finland u soo guurin? <i>Qor wadamada oo dhan / Wadama kale ma jiraan / Ma aqaan</i> | | QAAB NOLOLEEDKAAGA: Ma waxa aad ku noolayd darbiyada, xeryaha qaxoontiga, kaamamka mise meel ayaa lagugu hayey mise xabsiga ayaad ku jiri jirtay? <i>May / Darbiyada / xeryaha qaxoontiga / Kaamamka / Meelaha dadka lagu hayo / Xabsiga / Ma aqaan</i> | | |
| Kormiinka | Ma u barbaartay oo ma u kurtay sida ilmaha da' daada ah? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | | | | |
| Cudurada | XAALADA CAAFIMAADKA: Sidee ayuu caafimaadkaagu yahay imika? Sidan ku jawaab: <i>Aad iyo aad ayuu u fiican yahay / wuu fiicanyahay / waa iska caadi / wuu xun yahay / aad iyo aad ayuu u xun yahay</i> | | CUDURADA MUDADA DHEER KU HAYEY: Miyey jiraan cudur ama xanuun muddo aad u dheer ku hayey? Sida Dhiigkarka, Cudurka dhimirka, Wadna-xanuun ama xasaasi (allarji). <i>Qor xanuunada / Ma jiraan / Ma aqaan</i> | | |
| | RAADRAACA CUDURKA QAAXADA: Adiga ama qof reerkaaga ka mid ahi, miyuu qaaday cudurka qaaxada? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | | CISBITAAL-JIIFKA IYO QALNIINKA: Miyaa lagugu sameeyey baadhitaano balaadhan, qalniin, daawayn ama miyaa cisbitaalka lagu dhigay muddo dheer? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | | |
| Daawaynta | DAWADA AAD IMIKA QAADATO: Dawooyin nocee ah ayaad imika isticmaashaa? Ma waxa jira daawooyin lagu qoray oo aanad imika isticmaalin? | | | | |
| Xaalada caafimaad ee maanta | XANUUNADA: Imika bishii ugu danbaysay, miyaad dareentay xanuuno ama miyaad bukaan noqotay? Xanuunku waxa uu noqon karaa ilig-xanuun, dhabar ama madax xanuun, calool xanuun, maqaar xanuun ama miisaan badan oo kaa dhaca. <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | | | | |
| | XUMAD/QANDHO: Imika bilihii ugu danbeeyey, miyaad isku aragtay xumad ku haysay illaa muddo 3 asbuuc? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | | QUFACA: Imika bilihii ugu danbeeyey, miyaad isku aragtay qufac, Mid leh xaako badan ama dhiig? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | | |
| | WAX QABADKAAGA: Miyey jirtaa caafimaad darro ku haysaa oo waxqabadkaaga saamaynaysa ?/ Tusaale ahaan wax qabadka nolo-maalmeedkaaga? Sidan ku jawaab: <i>Ma jirto / Way jirtaa, laakiin wax badan maaha / Haa si aad iyo aad ah</i> | | | | |

| | |
|--|--|
| ARAGA: Aragtida indhahaaga wax dhib ahi miyey ka jiraan? Tusaale ahaan, araga indhaha ee waxqabadka nolol-maalmeedkaaga? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | MAQALKA: Maqalkaaga dhagaha miyey wax dhib ahi ka jiraan? Tusaale ahaan maqalka dhagaha ee waxqabadka nolol-maalmeedkaaga? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> |
|--|--|

| | |
|--|---|
| Caafimaadka iyo awooda maskaxda | ARIMO NAXDIN KUGU REEBA: Qofka bini'aadanka ahi waxa uu la kulmi karaa arimo naxdin leh, waxa ay kuwaasi wax yeelayn qoto dheer leh u keeni karaan korniinka, caafimaadkaaga iyo horumarka ilmaha. Markaa waxa aan idin waydiinayaa, in aad marxaalado saas ah soo marteen. Miyuu ilmuhu la kulmay arin naxdin u keenta maskaxdiisa iyo jirkiisaba? Arimahaasi waxa ay noqon karaan shil uu ilmuhu galay, jidhdil loo gaysto ama dagaalo uu arko isaga oo waalidkii la socda ama in uu waalidkii ka lumo. <i>Haa / May / Ma aqaan</i> |
| | DHAAWACYADA: Ma dhaawac ayaa kugu yaala, ka yimid jug ama jidhdil? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> |
| | DAREENKA NOLOSHA: Ma dereen-jab nololeed ayaa adiga ama ilmaha ku dhacay? Dareen-jabka nololeed wax uu noqon karaa tusaale ahaan xanaaq badan, farxad la'aan, warwar, dib u gurasho, cabsi ama fikir ah in aad isdicho. Sidan oo kale ku jawaab: <i>May saas maaha / hal mar ayaan sanadka dhan isku arkay / sanad kasta / bil kasta iyo asbuuc kasta / maalin kasta / Ma aqaan</i> |
| | QAAB DHAQANKA XUN: Qaab dhaqankaaga ama ka ilmaha miyuu xunyahay? Markasta ma sidaas baa? Qaab dhaqanka xuni waxa uu noqon karaan tusaale ahaan dagaal badan ama in aanu ilmuhu cidna dheg u dhigin. Ama qaab dhaqan ka baxsan sida ay ilmuhu u dhaqamaan oo hanjabaad badan leh. Sidan ku jawaab: <i>May saas maaha / hal mar ayaan sanadka dhan ku arkay / sanad kasta / bil kasta iyo asbuuc kasta / maalin kasta / Ma aqaan</i> |
| | FIRFIRCOONI XAD DHAAF AH: Adiga ama ilmuhu ma waxa aad leedihiin firfircooni aad u xad-dhaaf badan iyo foajignaan la'aan? Markasta ma ssa ayaad tihiin? Foajignaan la'aanta iyo firfircoonida aadka u xad dhaafka ahi, waxa ay yihiin tusaale ahaan wax u fiirsasho la'aanta, kacsanaanta iyo kulkulayl iyo xanaaq aad u badan. Sidan ku jawaab: <i>May saas maaha / hal mar ayaan sanadka dhan ku arkay / sanad kasta / bil kasta iyo asbuuc kasta / maalin kasta / Ma aqaan</i> |

| | | |
|--|--|--|
| Isticmaalka waxyaabaha caafimaadka u darran | SIGAAR IYO TUBAAKO: Ma waxa aad cabtaa sigaar mise kuwo kale oo nikotiinku ku jiro, sida sigaarka elektarooniga ah, ama shiishada, mise hore ayaa u cabi jirtay sigaarka oo imika waad iska daysay? <i>Ma cabo/ Sigaar / Tubaako / Sigaar elektarooni / wax kale</i> | ISTICMAALKA SIGAARKA AMA TUBAAKADA: Sidee ayaad u isticmaashaa? <i>Maalin kasta / Mar mar / Ma isticmaalo / Waan iska daayey</i> |
| | ISTICMAALKA KHMARIGA EE QOFKA DHALINYARTA AH: Ma isticmaashaa khamri? Imisa jeer maalintii? Sidan ku jawaab: <i>Maalin kasta / 3-6 jeer asbuucii/ 1-2 jeer asbuucii/ 1-3 jeer bishii / 7-11 jeer sannadkii / 4-6 jeer sannadkii / 1-3 jeer sannadkii / Hal mar in ka yar sanadkii / Ma isticmaalo</i> | |
| | ISTICMAALKA DAROOGADA KALE: Miyaad isticmaashay daroogo kale sida kannabiska, qaadka ama daroogo kale ama daawooyin loo isticmaalo in maanka lagu dooriyo? <i>May ma isticmaalo / daroogooyinka obiyoodhiga / Daroogooyinka maanka maskaxda bedela / Kiniinka hurdada ama kuwa maanka dajiya / Daroogooyinka miirka qaada / Daroogo dareer ah / Xabagta la nuugo / Kannabiska / Kuwo kale / Ma aqaan</i> | |
| | RAASHINKA: Ma raashin ama wax raashimada ku jira oo aad iska ilaaliso ayaa jira? <i>Raashinka laktooska lahayn ama uu ku yaryahay / raashimada bilaa gluteeniga ah / Raashinka khudaarta ah ee caanuhu ama ukuntu kujirto / Raashinka khudaarta ah laakiinse uu kaluun ku jiro / Raashinka Fiiganka/ Allarjiga qamandiga / Allarjiga caanaha/ Allarjiyo kale / Raashin kale oo gaar ah</i> | |
| | DHIBAATADA HURDO LA'AANTA: Imika bilihii ugu danbeeyey miyaad isku aragtay hurdo la'aan? Tusaale ahaan in aad seexan waydo ama habeenkii soo kac kacdo? <i>Haa seexan waa / Cabaar ma huri karo / Subixii wakhtu hore ayaan toosayaa / khalkhal wakhtiga hurdada ah / Daal badan oo maalintii ah / khalkhal kale</i> | ILKA CADAYGA: Ilmisa jeer ayaa ilkaha cadaydaa maalintii? Laba jeer ama in ka badan maalintii / Hal mar maalintii / Hal mar in ka yar maalintii. |

| | | | | | |
|-------------------------------|--|---|--|--|--|
| Galmada, dhalniinka iyo uurka | BILOWGA WAREEGA CAADADA: Weli caadadii ma kaa timi? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | | DHIBAATADA WAREEGA CAADADA: Dhanka caadada miyaad dhib ka dareemaysaa? <i>May / Marka aan caadada leeyahay waa xanuun / Dareer dhiig ah oo aad u badan / Wareega caadada khalkhal ayaa ku jira / Siyaabo kale oo xanuun ah, Sidee?</i> | | |
| | UUR QAADIS: Uur ma leedahay? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | CAADADII KUUGU DANBAYSAY: Goorma ayey caadadii ugu danbaysay kugu dhacday? | IMISA UUR: Waligaa uur ma qaaday? Hadii aad qaaday, imisa jeer? | IMISA DHALNIIN: Wax ma dhashay? Hadii aad dhashay, imisa jeer? | |
| | Waxa aan ku waydiinayaa arimo galmada iyo lamaanahaaga ku saabsan. Waxa aan kaala hadlayaa oo aad oggaanaysaa, in aad u baahantahay talooyin, baaritaano ama daawayn. Waxa adiga aad muhiim kuugu ah, in aad ka jawaabto su'aalahaan. Ha ka fikirin sida ay dadkaagu ama bulshadaadu u arkaan arimahan. Finland qofna laguma cunsuriyadayn karo qaab galmeedkiisa ama cidada uu la galmoodo | | | | |
| | GALMADA: Myaad galmootay waligaa? | | GALMADA: Miyaad galmo samaysay imika sanadkii ugu danbeeyey? <i>Waligay galmo ma samayn / Haa galmo caadi ah / Haa galmo nin iyo nin ah ama naag iyo naag ah / Ma sheego karo</i> | | |
| | IMISA QOF AYAAD LA GALMOOTAY: Imisa qof ayaad la galmootay imika sanadkii ugu danbeeyey? <i>Hal mar uun / 1-10 / in ka badan 10 / Ma sheegi karo</i> | | ILMO-JOOJIN: Mar rabtaa in ilmo-joojin ama cudurada galmada lagu kala qaado lagaa ilaaliyo? <i>Midnaba uma baahni / Waan u baahnahay, laakiin ma haysto / Ilmo-joojin waan isticmaalaa / Ma sheegi karo</i> | | |
| | GUDNIINKA: Wadamada qaarkood wiilasha ama gabdhaha waa la guda, taas oo keeni karta caafimaad darro. Adiga miyaa lagu gudo? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | GUDNIINKA WAALIDKA (SU'AASHA WAALIDKA): Ilmaha hooyadii ama aabihii miyey gudan yihiin? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | MIYAAD GUDAYSAA ILMAHA (SU'AASHA WAALIDKA): Miyaad ku fikirtay in aad ilmahaaga gudo? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | | |
| Faahfaahin kale | | | | | |

| |
|--|
| ARIMAHA KHATARTA KEENI KARA (tusaale ahaan allarjiga daawooyinka) |
| |

| | | |
|--|--|---|
| MARXAALADA MAANTA (STATUS) | | |
| MAQAARKA: Wax miyaa lagu arkay baaritaanka maqaarka jirka? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | BAARITAANKA AFKA: Wax miyaa laga arkay Baaritaanka caafimaadka afka? <i>Haa / May / Ma aqaan</i> | Waxyaabaha dheeraadka ah ee marxaalada maanta |

| | | |
|---|----------------------|--------------------------------|
| CABIRKA AMA BAARITAANKA JIRKA | | |
| DHIIGKARKA IYO WADNE GARAACA: | | CABIRKA XUMUDDA: |
| MIISAANKA, kg: Miisaankaagu miyuu is bedelay? | DHERERKA, cm: | CABIRKA WAREEGA MADAXA: |

| |
|---|
| TALAALADA |
| TALAALADII HORE: Talaalo nooc ee ah ayaad soo qaadatay/ama ilmaha la siiyey, intii uuna Finland iman? <i>Wax talaal ah ma jiraan / talaalo way jiraan / Talaalada wadanka aanu ka nimi lagu qaato oo dhan</i> |

| |
|--------------------------------|
| MACLUUMAADKA TALAALADA: |
|--------------------------------|

| |
|-----------------|
| QORSHAHA |
|-----------------|

| | |
|---|---|
| QORSHAHA: | |
| DAAWAYNTA IYO BAARITAANADA KALE: <i>Raajisada / Baaritaanka dhiigaga / Baaritaanka hore ee dhakhtarka / Neersta kaamka / Dhakhtarka / Dhakhtarka ilkaha / Cisbitaalka daryeelka hooyada ama ilmaha / Goobta caafimaadka ee iskuulka ama ardayda / shaqaalaha sooshalka / Baaritaan udirid kale ama ballan leh</i> | |
| HAGID: <i>Macluumaadka caafimaadka / Daawooyinka daryeelka ee shakhsiga / Daryeelka dhimirka / Caafimaadka CELI / Nafaqaynta / Caafimaadka afka / Meel u dirid kale</i> | |
| OGOLAANSHO SIINTA: <i>Waa ogol yahay / In ayuu ka ogol yahay / Ma ogola</i> | OGOLAANSHO WAYDIISIGA: <i>Waa ogol yahay / In ayuu ka ogol yahay / Ma ogola</i> |
| SAXEEXA: | |